

## Xaafiiska Canshuuraha wuxuu baaris hantidhowr ku samaynayaa (dib-u-eegayaa) canshuur-celintayda. Hadda maxaan sameeyaa?

*Macluumaadka boggan ku yaalla wuxuu ku siinayaa warbixin kooban baarista hantidhowrka iyo kuu sharraxayaa xuquuqdaada muhiimka qaarkood ka canshuur-bixiye ahaan.*

### **Waa maxay hantidhowr?**

Hantidhowrku waa dib eegid lagu sameynayo canshuur-celintaada. Waaxda Canshuuraha Minnesota hadafka ay ka leedahay baarista waa in la hubiyo in si saxa canshuurtii laguugu lahaa kaaga soo xareynay. Inta baaristu socoto, waxaanu isticmaaleynaa macluumaadka aan adiga kaa helno iyo kuwa kaleba. Hantidhowraha kiiskaadaa loo xilsaaray wuxuu kuu sheegi doonaa macluumaadka aan adiga kaaga baahannahay.

### **Goormaad baaraysaan canshuur-celintayda?**

Guud ahaan, waxanu haysannaa  $3\frac{1}{2}$  sano oo ka soo bilaabata taariikhda lagaa rabay canshuur-celinta ama taariikhda aad xaraysay canshuur-celinta, hadba kii danbeeya. Sikastaba, haddii aadan xarayn, ma jiro waqt xaddidan.

Sidoo kale, xaddiga waqtigaas waxaan dheereyn karnaa markay ay jiraan duruufaha qaarkood, tusaale, haddii aad wax ka baddashid canshuur-celintaada federaalka, taaso si weyn uga muuqata cashuur-celintaada, ama xaraysid canshuur-celin been ah ama khiyamaysan.

### **Ma heli karaa cid i caawisa?**

Haa, waxaad raadsan kartaa canshuur xereeye kasta, garyaqaan, ama qof qaangaar ah oo kale oo wakiil kaaga noqda inta baaristu socoto. Haddii qof kale kaa wakiil yahay, waa in qofkaas aad siisaa oggolaasho qoraala. Buuxi oo saxiix Foomka REV184, Qoraalka Wakaaladda, una dir hantidhowraha kula soo xariiray.

Foomka REV184 waxa aad ka heli kartaa mid kasta oo baraheenna intrnetka ka mida [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us), adigoo naga soo wacaya telefoonka 651-296-3781 ama 1-800-652-9094, ama noogu soo hagaajinaya cinwaankaan:

Minnesota Tax Forms  
Mail Station 1421  
St. Paul, MN 55146-1421

### **Maxaa dhacaya haddii aan kulanka ka soo ogaadey in aan caawimaad u baahanahay?**

Kulanka hantidhowrka haddii aadan wadan wakiil ku matala, oo islamarkaana aad doonaysid, waxaannu joojinaynaa kulanka waxaan ku siinaynaa 30 cisho si aad ula xariirto wakiilkaaga. Dib ayaanu kuugu muddayn doonna kulanka. Si kastaba, baarista hantidhowrku waa sii socon doontaa.

Dib u-muddaynta kulanka waxay u baahantahay in la kordhiyo waqtiga lagu dhammaystirayo baarista. Tanu haddii ay dhacdo, waxaanu kaaga baahannahay in aad saxiixdo caddayn si muddada loo kordhiyo.

## **Maxaa dhacaya marka la gabagabeeyo baariista?**

Marka aan gabagabayno baarista, waxaanu kuu soo diri donnaa sharraxaad cad oo ku saabsan wixii nooga soo baxa iyo isbaddal kasta oo aanu ku samayno xisaab-celintaada.

## **Xuquuqda aad leedahay ka canshuur-bixiye ahaan**

Haddii aanu nahay Waaxda Canshuuraha Minnesota waxaa naga go'an in aan taageerno xuquuqdaada ka canshuur-bixiye ahaan. Wixii maclumaad dheeraada gal barteenna [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) ka bacdina riix Taxpayer Rights boogaa xaggiisa hoose ama la xariir Taxpayer Rights Advocate.

Waxaa kale oo xaq u leedahay:

- In aad heshid ogaysiiska canshuurta iyo biilasha sharraxaya canshuur laguugu leeyahay, ganaaxyada, iyo dulsaarka- iyo sababta.
- In aad ogaato sababta aan kuu weydiinayno maclumaadka iyo waxa dhici doona haddii aadan nasiin maclumaadka.
- In aad dhaqso u heshid, si xushmad leh, iyo su'aalahaaga oo si saxan looga jawaabo.
- In aad filato in aan la kashifiyn maclumaadka aad na siisay, marka laga reebo arrimaha sharcigu oggolyahay keliya.
- Uqalanto in aad yeelato xisaabiye, garyaqaan, ama qof kale oo qaangaar kaa wakiil noqda waqtii kasta.
- In la duubo wareysiga adiga ay kula yeelatay waaxda shaqaalaha haddii aad horey noo soo wargalisay.
- In aad iibsato koobigaa lagaa duubay haddii annagu aan wareysiga adiga kaa duubnay adiguna aadan duuban.
- In aad nagu dacweyso maxkamadda haddii aad rumaysantahay in waxyeellada kaa soo gaaray mid ka mida waaxda shaqaalaha si taxadder la'aana ama si ulakaca iska indhatiray sharciga markii canshuurta laguugu yeeshay la uruurinayay. (Si kastaba, haddii maxkamaddu ay ogaato in dacwaddu tahay mid aan macno weyn lahayn, ama loola jeeday mid wax lagu seetadheeraynayo, maxkamaddu waa ku ganaaxaysaa.)

## **Waxa aad la xariri kartaa U-doodaha Xuquuqda Canshuur-bixiyaha (Taxpayer Rights Advocate)**

Iyado ay nagu adagtahay markasta oo aanu isku dayno xalliinta khilafaadka ka yimaada canshuur-bixiyeyaasha, markasta taas ma samayn karno, waxa aad nagala soo xariiri kartaa Taxpayer Rights Advocate. Xaafiiska U-doodaha (The Advocate's Office) wuxuu kaa siinaya dib u eegis madaxbannaan xaaladdaada canshuurta iyadoo aan loo sheegayn canshuur qaade kasta ama qaybaha uruurinta.

Telefoonka: 651-556-6013 ama 1-855-452-0767 (telefoonka lacag-laanta)

Iimaylka: dor.tra@state.mn.us